

Baro Xuquuqdaada iyo Mas'uulliyadaha Ku Saaran.....

- Waxaanu danayneynaa waxaanu dooneynaa in aanu ku caawino si kasta oo aanu kugu caawin karno.
- U adeegso macluumaadkeena si aad uga qorato lambarada muhiimka ah
- Keydi macluumaadka waa intaas oo aad mar u baahataa ama aad u baahato in aad saaxiibkaa siiso
- Haddii ay jirto wax aadan fahmin, la soo xiriir qof ka shaqaalaha ah ee xaaladdaada gacanta ku haya ama horjooghiisa.

Magaca qofka shaqaalaha
ah iyo Lambarkiisa



Magaca horjoogaha
iyo Lambarkiisa



Franklin County
**Children
Services**

Adeegga Caruurta ee
Degmada Franklin

855 West Mound Street
Columbus, Ohio 43223
www.franklincountyohio.gov/children_services

(614) 275-2621

(614) 229-7000 (24ka saac)



Qof
Da'yar oo
Daryeel naga h
elaya Waxa aad
xaq u Leedaha
y.....



Franklin County
**Children
Services**

Adeegga Caruurta ee
Degmada Franklin

Til maame ku Saabsan
Xuquuqdaada iyo

Mas'uulliyadaha ku saran

Xaq Waxa Aad u Leedahay

Xaq waxa aad u leedahay:

In aan lagu qashqashaadin ama aan midabtakoor lagugu sameyn qowmiyaddaada, midabkaaga, diintaada, jinsiga, dhaqankaaga, iyo doorashadaada jinsiga.



In aad hesho nabadgelyo.....aan dhibaato jirka ah iyo xadgudub jinsiga ah aan lagu geysan



In aad ku noolaato meel nadiif ah inta ku hareereysana nadiif tahay



In aad hesho cunto munaasib kuu ah kuguna filan iyo dhar



In qof weyn uu kuu fidiyo talo, taageero iyo kor kala socosho isla markaana kaagala shaqeeyo sida danta kuu ah.



In aad hesho daryeel caafimaad oo munaasib kuu ah isla markaana aan lagu siin daawo aan muhim kuu ahayn ama aadan u baahneyn



In aad tagto dugsiga ama aad ka qeyb gasho barnaamij waxbarasho



In aad xor u ahaato fikirkaaga iyo diintaada In



lagu siiyo xoriyad macquul ah



In aan lagu saarin xujooyin aan loo baahneyn ama gooniyeyn*



In ra'yigaaga la dhageysto laguguna daro inata ugu badan ee suurto galka ah marka go'aan ku khuseeya la gaarayo.



In lagaa qeyb galiyo laguna siiyo nuqul ka mid ah qorshaha lagu sameeyo



Iyadoo ku xiran sida uu u dhigan yahay qorshaha lagu dejiyey, waxaa kale oo aad xaq u yeelan kartaa.....

In aad haysato lacagtaada iyo alaabtaada



In aad la xiriiri karto, adiga oo kula xiriiraya telefoon si gaar ah lagugu ogolaaday ama warqadaha, xubnaha qoyska iyo saaxiibadaada aad kala nooshihiin



* Nidaamkan waxa lagasoo xigtey Maamulka Adeegga Caruurta ee degmada Franklin.

Xuquuqda kale waxaa ogolaaday nidaamka Ohio ee dib loogu noqday iyo kan Mamulka

Waxaa Mas'uuliyad kaa Saaran Tahay

Xuquuqda waxaa ku lamaan mas'uuliyado.
Mas'uuliyadaha ku saran qaarkood waxaa ka mid ah

- In aad qof kasta ula dhaqanto si xushmad leh adiga oo aan u kala eegin, qowmiyadda, midabka, diinta, dhaqanka iyo dorashadiisa jinsiga ah
- Inaad naftaada u dabacsanaato iyo tan dadka kalaba. Naftaada dhaawac ha u geysan iyo tan dadka kalaba
- Ka dhig goobta aad ku nooshahay mid nabadgelyo ah isla markaana nadiif ah
- Si hagaagsan u dooro raashinka aad cunto iyo cabitaankaba isla markaana baro sidii aad u karsan lahayd cuntadaada.
- Ku qanacsanoow sida aad u eg tahay...Naftaada iyo dharkaaga nadiif ha ahaadaan...Baro in dharku yahay wax la xirto oo kaliya iyagu waxba kaamadhigaan.
- Ixtiraam dadka waaweyn ee kuu siinaya talada kuuna fidinaya gargaarka xitaa marka aad wax aad ku diidan tahay jiraan.
- Dooro dariiqada aad ku gaareyso cafimaadka jirka iyo maskaxda ah.
- Raadso waxbarashada ugu wanaagsan ee aad heli karto..... baro xirfadaha kugu gargaaraya in aad hesho shaqo aad jeclaato.
- Dooro dariiqada diinta ee adiga kuu haboon isla markaana ixtiraamka mudan. Ixtiraam diimaha dadka kale haystaan ee ay doorteen in ay ku cibaadeystaan.
- Baro in aad isku miisaanto waqtiga aad gaarka ugu baahan tahay iyo kan aad bulshada ku dhex jirto.
- Baro sida dadka loola wadaago ra'yigaaga adiga oo ixtiraamaya...baro in aad ra'yigaaga bedesho, xitaa marka ay dadka kale kugu diidaan...baro in aad ra'yigaaga bedesho marka aad ogaato macluumaad cusub.

Haddii aad wax su'aal ah ka qabto xuquuqda aad leedahay iyo mas'uuliyadaha ku saaran, halkan waxaan u joognaa in aanu ku caawino. Nala soo xiriir mar kasta



Waxaa jira Dad Daneynaya

Waxaa jira dad daneynaya daryeelkaaga oo ka tirsan Adeegga Caruurta ee Degmada Franklin. Haddii aad qabto wax su'aal ah ama aad u baahan tahay caawinaad, la xiriir qofka shaqaalaha ah ee xaladdaada gacanta ku haya. Haddii aadan heli karin qofkaas, la xiriir qofka madaxda u ah. Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada lagu xadgudbay, la soo xiriir **Adeegga Caruurta:**

Xafiiska xaquuqda Macaamiisha

(61) 279-26221 (Isniin jimce 8da aroornimo 5ta galabnimo)

Khadka Xadgudubka ama Dayaca

(614) 229-7000 (waxaad heli kartaan 24ka saac)

Waxaa jira lambaro kale oo aad wici kartaan haddii aad mar uun u baahataan cawinaad:

Xarunta Heer Qaran ee Caruurta ka Baxsata Guryahooda

1-800-621-4000 (1-800-RUNAWAY)

TDD:1-800-621-0394 (dadka dhagaha la'a ama aan si fiican wax u maqal)

Xarunta Gargaarka Degdegga ee Caruurta ee Huckleberry (GURIGA HUCK)

Gargaar 24/7 ah oo loogu tala galay caruurta da'doodu u dhaxeeyso 12 -17 jir ee ka baxsada guryahooda ama ay la soo deristo dhibaato qoys. Imoow ama soo wac

1421 Hamlet Steet , Columbus, Ohio 43201

(614) 294-5553

Khadka ka Hortaga Dadku is Dilaan

Qof kula hadlaya 24/7 si uu kuula wadaago dareenkaaga isla markaana kugu xira dad kale oo ku caawinaya

1-800-273-8255 (1-800-273-TALK)

1-800-784-2433 (1-800-SUICIDE)

Adeegga Degmada Franklin ee ka Hortagga Isdilka Caruurta

24/7 adeeg diyaar ah haddii aad dareento inaad xamili karin

(614) 294-3300

Shabakadda Heer Qaran ee ka Hortagga

Kufsigu, Xadgudubka, Xadgudubka Galmoodka. (RAINN)

24/7 caawinaad diyaar kuu ah oo kugu xireyas xarumaha la geeyo dadka la kufsado

1-800-656-4673 (1-800-656-HOPE)

Xarunta Dhexe ee Ohio ee Dadka Galmoodka Loogu Xadgubo

24/7 qof aad la hadleyso oo ku gargaaraya haddii kufsi lagu geystay ama xadgudub jinsi ah lagu geystay; waxa ay kuu fidinayaan daawada aad u baahan tahay iyo wixii la talin ah

(614) 267-7020

Kaleidoscope

Xarunta Dhalinyarada ee Kaleidoscope ee dadka kala jinsiga duwan iyo su'aalaha ay ka qabaan dhalinyaranimadooda iyo hadba halka ay raacsan yihiin ee ka yar 21ka sano

(614) 294-7866